

BARNAAMIJKA SPRWS LAGU CIRIBTIRO SUNTA RINJIGA NIDAAMKA BEDELIDDA KHADKA TUBOYINKA LEDHKA



Waxyaabaha aad fili karto KA HOR / MUDADA AY SOCOTO / KA DIB bedelidda

BEDELIDDA KA HOR

Talo loo jeedinayo mulkiilayaasha: Si loo hubiyo in aadan waxba ka tagin, waa in aad hubisaa in aad raacdo talaabooyinka kuwa ku khuseeya.

○ Soo gudbi Foomka aad ku cadeyneyso in aad dooneyso in aad ka qeyb qaadato

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha lagu bedelayo khadka, raac talaabooyinka ku xusan bogeenna internetka ee foomka doonista:



stpaul.gov/ServiceMaterialMap

○ Saxiix Heshiiska

Ka dib marka aad soo gudbiso foomka doonista, waxaa lagu soo dirayaa heshiiska bedelidda tubooyinka, oo si elektaroonig ah laguugu soo diri karo ama boostada.

○ Codso balanta ka horeysa inta aan tubooyinka la bedelin gurigaaga

Shaqaalaha xafiiska ayaa kula soo xiriiriya si ay kulan gaaban kuula yeeshaan. Waxaa lagaa doonayaa in aad alaabada ka fageeyso agagaarka saacadda biyaha.

MUDADA BEDELIDDA

MARXALADAHA SHAQADA

Qoditaanka

Si tubooyinka loo geliyo, shaqaaluhu waxaay qodayaan 3-4 goobood oo yaryar. Mid ayaa ku jira dhulka hoose, mid wadada hore ah, mid wadada u dhaxeysa ah iyo mid daaradda hore ah.

Bedelaadda


Khadka tubooyinka waxaa lagu bedelayaa mid maar ka sameysan. Waxa ay isku xireysaa biyaha magaalada iyo tubooyinka gurigaaga ee saacadda biyaha.

Tijaabinta Khadka Cusub

Waxa aan tijaabineynaa khadka cusub ilaa biyuhu saaraan dhamaan qashinka iyo waxyaabaha ledhka ka haray.

Dib U Soo Celin Ku Meel Gaar AH

Godadka iyo wadooyinka si ku meel gaar ah ayaa loo buuxinayaa ilaa ciidda ay ka degto ka dibna si rasmi ah loo buuxiyo.



Khadka xuduudda guriga

Waddo lugeed

Waddo kala qeybisa

Wadooyinka

Khadka biyaha ee tubooyinka biyaha

Tubooyinka biyaha ee Magaalada

*Waxaanu ku dadaaleynaa in aan aad u yareyno dhaawaca soo gaari kara dhulka iyo guriga.

Bedelaad LACAG LA'AAN AH eeBarnaamijka SPRWS Lagu Ciribtirayo Ledhka ee SPRWS



Khadka biyaha


MUDADA BEDELIDDA

Talo loo jeedinayo mulkiilayaasha: Si loo hubiyo in aadan waxba ka tagin, waa in aad hubisaa in aad raacdo talaabooyinka kuwa ku khuseeya.

Bedel Madaxa Hore ee Tubooyinka Biyaha Guriga Dhexdiisa

Marka tubooyinka labedeloo biyaha la soo daayo, waa in aad bedeshaa madaxa hore ee tubooyinka laga cabo iyo kuwa qubeyska, waxa aad bedeleyso waa madaxa ee tubooyinka biyuhu ka soo baxaan ee laga shubto ama cabo.

Madaxa hore ee tubooyinka biyaha laga shubto



Madaxa hore ka fur ka dibna nadiifi

Guriga oo dhan biyaha fur

Ka dib marka aad bedesho madaxa tubooyinka laga shubto biyaha iyo madaxa hore ee tubada qubeyska, waa waqtigii aad biyaha tubooyinka ka saari laheyd:

1. Ka dib marka aad bedesho madaxa tubooyinka laga shubto biyaha iyo madaxa hore ee tubada qubeyska, waa waqtigii aad biyaha tubooyinka ka saari laheyd.
2. **Biyaha ha socdaan ilaa 30 daqiiqo.**
3. Ka dib biyaha xir adiga oo ka soo bilaabaya guriga xagiisa hoose ilaa aad kor ugu socoto.

**Biyaha
FUR oo
xir ADIGA
hoos ka
soo
bilaabaya**



Nadiifinta

Ka saar dhamaan waxyaabaha ku sameysma tubooyinka biyaha laga shubto iyo madaxa qubeyska. Ku dhig madaxa ee tubooyinka laga cabo khal (vinegar) ilaa shan daqiiqo, ka dibna dib ugu rakib madaxa tubada iyo madaxa qubeyska.

30KA MAALMOOD EE SOO SOCDA

Si joogta ah biyaha u fur oo ha socdaan

Biyaha qaboow ha socdaan ilaa 5 daqiiqo subax kasta ka hor inta aadan cabin ama cunto ku karsan. Sidoo kale sidan samee marka kasta oo biyaha muddo dheer la isticmaalo.

Qubeys oo aad qubeysato waxa ay ka dhigan tahay in biyuhu soconayaan.



Xusuusnoow:

Inta badan biyaha qaboow u isticmaal cabitaanka, cunto karsiga, iyo cuntada loo diyaariyo caruurta si loo yareeyo khatarta leedhka ee ku haray kuleyliyaha biyaha.

3-6 BILOOD EE SOO SOCDA

**TALAABOYINKA
UGU DAMBEEYA**

Dib u buuxinta rasmiga ah

Shaqaalaha ayaa soo noqonaya 4 bilood ka duib si ay si rasmi ah u buuxiyaan godadka daaradda guriga iyo wadooyinka ay qodeen.

Tijaabada Leedhka

Waxaanu qaadeynaa muunadda biyaha 3-6 bilood si loo tijaabiyo heerka ledhka ku jira tubooyinka la bedelay.



DHAMAAD

Nadiifiyayaasha Biyaha

Hay'adda Badbaadada Degaanka waxa ay ku talineysaa isticmaalka nadiifiyaha biyaha ee NSF/ANSI 53 certified pitcher muddo lix bilood ah ka dib marka la bedelo khadka tubooyinka.



La soo xiriir

-  **651-266-6820**
-  **lead@stpaul.gov**
-  **stpaul.gov/lead-free**



Para más información, póngase en contacto con el equipo de SPRWS "Libre de plomo" en el 651-266-6820. Se le facilitará un traductor.

Kom paub cov ntaub ntauv ntau ntxiv, tiv tauj Lead Free SPRWS pab pawg ntawm 651-266-6820. Yuav muaj ib tus kws txhais lus rau koj.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad, la xiriir Barnaamijka SPRWS ee 651-266-6820. Iyaga ayaa turjubaan la imanaya.